**WAA MAXAY TIRAKOOBKU?**

Shantii sanoba mar, Tirakoobku wuxuu diiwaangeliyaa qof kasta iyo qoys kasta oo ku nool Australia.

Wuxuu ku weydiinayaa su’aalo ku saabsan da’daada, asalkaaga, luqadaha aad ku hadasho iyo shaqada aad qabato. Jawaabahaagu waa sir, sharciguna wuu ilaaliyaa.

Jawaab kasta waxay naga caawisaa inaan fahanno waxa Australia u baahan tahay hadda iyo mustaqbalka.

Tusaale ahaan, meelaha laga dhisayo ***iskuullada*** ama ***isbitaallada***, sida loo qorsheeyo ***gaadiidka dadweynaha*** iyo sida loo ***taageero bulshooyinka***.

Sannadkan, Tirakoobku wuxuu dhacayaa **11-ka Agoosto, 2026**. Waxaad Tirakoobka u buuxin kartaa siyaabo kala duwan.

Qoysaska intooda badan waxay heli doonaan warqad ay Tirakoobka kaga buuxinayaan internetka.

Waxaad codsan kartaa inaad ku buuxiso foom warqad ah, ama inaad naga hesho caawimaad.

Ka qaybqaado, nagana caawi inaan helno jawaabaha lagu dhisayo mustaqbalka Australia.

Si aad u hesho caawimaad ku saabsan buuxinta Tirakoobka iyo macluumaad la turjumay, booqo [www.census.abs.gov.au](http://www.census.abs.gov.au)